JUQRAAFI: CUTUBKA 4AAD : SU'AALO&JAWAABO :

1) Wax ka qor Muuqaaladda Oogada dhulka soomaaliya?

J) Kala sarreynta dhulka soomaaliya waa kala jaad, inkastoo nooca ugu badan ee kajira dhulka soomaaliya uu yahay dul dhuleed, sidoo kale Oogada sare ee dhulka soomaaliya waxaa ku yar buuraha ama dhulka jooggiisu sarreeyo.

2) Tilmaam xuduudaha juqraafi ee dalka soomaaliya?

J) Haddii aynu eegno soomaaliya waxay deris latahay dalka jabuuti oo dhanka waqooyi kaga beegan, Kiinya oo dhanka koonfureed kaga beegan ugu dambeyn Itoobiya oo kaga beegan dhanka galbeed.

3) Sheeg wax yaabaha soomaaliya u horseeday in ay noqoto meel istiraatiiji ah ?

J) waxaa ka mid ah qodobbada soo socda:

#) Soomaaliya waxey qeyb katahay dhulka carabta ee baaxadda weyn kaa oo dhaco dhul juqrafi ahaan aad istiraatiiji u ah. #) waxaa lagu tiriyaa soomaaliya in ay dhacdo marinka dabiiciga ah ee loo maro bartamaha afrika. #) waxaa la rumeysan'yahay in soomaaliya ay tahay halka uu islaamka ka soo galay bartamaha iyo bariga afrika. #) waxay u taagan tahay isku xirka waddooyinka ganacsiga caalamiga ah.

4) Sheeg muhiimadda Badda?

J) #) waa hannaan dalku uu kula xiriiri karo dunida inteeda kale isagoo an usii marin dal kale . #) waxay kor dhineysaa il' baxnimada dalka maadaama uu sifudud kula xiriiri karo dalalka kale. #) Baddu waxay leedahay kheyraad aad u kala duwan.

5) Tilmaam Berriga iyo biyaha soomaaliya?

J) Soomaaliya waxaa lagu tiriyaa dal kulmiya Badd iyo Berri intaba, waxay leedahay dhul berri ah oo aad u ballaaran oo kuyaal Bariga afrika guud ahaan, gaar ahaana geeska afrika, bedka guud ee dalka soomaaliya wuxuu gaarayaa 637.657km^2 , sido kale soomaaliya waxey kulaaleysaa mid ka mid ah xeebaha afrika ugu dheer taa oo dherar ahaan gaareysa ku dhowaad 2800km.

6) Imisaa loo qeybiyaa Oogada sare ee dhulka soomaaliya?

J) si guud waxaa loo kala saaraa seddex qeybood :

#) Jiidda dulaha ah, #) Dusha dhexe , #) Dusha koonfureed .

7) Tilmaam shanta wax yaabood ee saameynta ku leh cimilada dhulka soomaaliya?

J) #) xilliga ay cadceeddu dul istaageyso. #) Joogga dhulka iyadoo loo eegayo heerka joogga badda . #) Halka ay xeebta u jeedo iyadoo loo eegayo jihada dabaylaha mansuunka ah . #) Cufnaanta dhirta . #) Filiqsanaanta biyaha iyo berriga .

8) Tilmaam labada bil ay cadceeddu dul istaagto ku qotonta dhulka soomaaliya ?

J) waa bisha Abriil iyo bisha Sabtembar , labadan xilli cadceeddu waxay noqoneysaa mid ku qotonta dhulka soomaaliya .

9) kahadal xaddiga roobka ee dhulka soomaaliya ?

J) Xaddiga roobka ee dhulalka xeebaha wuxuu ka hooseeya xaddiga roobka ee dhulka buuraleyda galbeed wax gaaraya 425mm , halkaa xaddiga roobka ee buuraleyda waqooyi-galbeed uu gaarayo 500mm , halka bannaan xeebeedka bari uu gaarayo 75mm.

10) sheeg wax yaabaha kadhasha Abaaraha iyo Daadadka ?

J) waxaa kadhasha dhibaatooyin dhaqaale , bulsho , siyaasadeed iyo kuwa deeganka laxiriira .

11) Maxaa kadhacey 1961CD dalka soomaaliya?

J) xilligaa waxaa wadanka ka da'ay roobaba hiigaan ah oo soocday muddo lex bilood ah, dhibaatadu waxay soo gaartey xitaa koonfurta dalka.

12) Abaarihii ku dhuftay dalka sanadihii 1974-1975, saameyn intee la'eg ayey kureebeyn dalka?

J) waxay galaafatay 25% xoolaha iyo daaqii soomaaliya.

13) Imisa ayaa lagu qiyaasaa dadka xoogsada ee bulshada ka mid ah?

J) waxaa lagu qiyaasaa 52% kaliya .

14) Imisa ayaa lagu qiyaasaa dadka an wax soo saarka laheen bulshada dhexdeeda ?

J) kudhowaad 48% bulshada soomaaliyeed waa dad aan waxba soo saarin .

15) Tilmaam qaab dhismeedka dhaqaale ee bulshada ?

J) waxay u kala baxaan waaxyaha shaqooyinka dadka:

#) Xoolo dhaqato 65% , #) beeraley 14% , #) xirfadleyaasha 8% , #) kalluumeysato 1% iyo dadka adeegyada kashaqeeya 12% .

16) Halkey ku nool yihiin dadka ugu badan dalka soomaaliya ?

J) 70% waxay ku nool yihiin koonfurta marka loo eego tirada guud ee dadka , kuwaa oo intooda badan kunool inta udhaxeysa labada wabi Jubba iyo Shabeelle , halkaa oo carradu iyo cimiladu ay yihiin kuwa aad uwanagsan.

17) Imisa ayaa lagu qiyaasaa dadka kunool magaalooyinka ?

J) waxaa lagu qiyaasaa dadka magaalooyinka deggan 20% guud ahaan tirada dadka , soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka uu aadka u yar yahay reer magaalkooda .

18) Xagee kaga jirtaa soomaaliya dhinaca xoolo dhaqashada dunida?

J) Soomaaliya waxaa lagu tilmaamaa in ay tahay dalalka ugu hodansan xagga kheyraadka xoolaha dalalka afrika iyo kuwa carabta , bulshada soomaaliya 70% waxay ka xoogsadaan xoolo dhaqashada.

19) Imisa ayaa lagu qiyaasaa badka dhulka daaqsinka leh ee soomaaliya ?

J) waxay gaareysaa ku dhawaad 28.65 malyan oo hektaar. badkani wuu ballaaranayaa sanadaha oo roobku badan yahay waxayna gaari kartaa 36 malyan oo hektaar .

20) Tilmaam cunnada ay si weyn ugu tiirsanyihiin dadka soomaaliyeed?

J) waa cunnooyinka kasoo jeeda wax soo saarka xoolaha sida hilibka iyo caanaha (Cad iyo Caano) .

21) Tilmaam caqabadaha dabiiciga ah ee heysta kheyraadka xoolaha ?

#) Saameynta cimilada isbedbedelka badan . #) Abaaraha iyo biyo yarida . #) Daaqsinka xad dhaafka ah oo khatar ku ah dhulka daaqsinka leh. #) Xannuunada xoolaha iyo daryeel yarida xagga caafimaadka .

22) Tilmaam caqabadaha aadanaha laxiriira ee heysta kheyraadka xoolaha ?

J) #) Qaab wax soo saarka oo hooseeya. #) Aqoon yarida laxiriirta hababka xoolo dhaqashada casriga ah . #) Adeegyada aasaasiga oo hooseeya .

23) Sidee loo beertaa habka waraabinta dabiiciga ah?

J) waxa loo beertaa habka waraabinta dabiiciga ah 60kun oo fadaan .

24) Sheeg Dalagyada laga beerto soomaaliya ?

J) Dalag yada dalka soomaaliya waa kala jaad waceyna isugu jiraan, Firiley, Qudaar , Miro iyo dalag yada laga ganacsado.

25) Tilmaam dalag yada ugu muhiimsan ee soomaaliya ka ganacsato ?

J) Waxaa kamid ah : #) Cudbiga iyo #) Muuska .

26) Sheeg dhibaatada milixda carrada ?

J) Waxay noqotay dhibaatada milixda carrada wax yaabaha ugu muhiimsan ee halista ku ah wax soo saarka dhirta iyo dalagyada .

27) Sheeg dhibaatada xarfashada carrada ?

J) Awooda xarfashada ama carro guurka guud ahaan waxaa keeni karo sababo badan oo ay kamid tahay : Heerka janjeedhka dhulka , xaaladda dhirta dabiiciga ah iyo roobabka mahiigaanka kediska ah .

28) Tilmaam kaalinta waaxda warshadaha (sanaacada) ee soomaaliya ?

J) Waaxda warshadaha soomaaliya kaalin muhiim ah kagama jirto dhaqaalaha soomaaliya , kama qeyb qaataan dakhliga iyo daboolidda baahida dalka wax badan.

29) sheeg tiirarka waaweyn ay leeyihiin warshaduhu ?

J) #) Helitaanka maaddada ceydhiinka ah , #) Shaqaale xirfadleyaal ah , #) ilo tamar , #) Isgaarsiin gaadiid , #) Ra'samaal , #) Suuq loo iib geeyo in lahelo badeecada warshadda .

30) wax ka qor waaxda kalluunmeysiga soomaaliya?

J) Soomaaliya waxay leedahay xeebta ugu dheer Afrika , oo kulaasha gacanka cadmeed iyo Badweynta hindiya , xeebahan aadka u dheer iyo meelalka dhaadheer ee biyahaan waxaa laga dhex helaa jiido kalluunmeysi sida ka muuqato khariidada , taa oo hodon ku ah noocyo badan oo kalluun ah.

31) Sheeg wax soo saarka guud ee Qaranka kalluunmeysiga ?

J) Saamiga waxa la kalluunmeysto waa 2% wax soo saarka guud ee qaranka .

32) imisa ayaa lagu qiyaasaa shaqaalaha waaxda kalluunmeysiga ?

J) Waxaa lagu qiyaasaa dadka kashaqeeyo kalluunmeysiga 96,000 oo qof .

33) Sheeg Noocyada kalluunka ee xeebaha soomaaliya ?

J) Noocyada kalluunka ee laga kalluunmeysto soomaaliya waa kala jaad waxayna gaarayaan 17 nooc , waxaana kamid ah , Abu shanab , Durak , shaar , Faris , Tuna , Bayad , Shadiya iyo Carabi iyo moocyo kale .

34) Tilmaam Caqabadaha heysta ka faa'iideysiga kalluunka soomaaliya ?

J) waxay kala yihiin :

#) Dhaqamada laga dhaxlay awooweyaasha ee kalluun cunidda gaarsiiyay ilaa xad inuu xaraan yahay oo kale . #) Hilibka xoolaha oo aad ubadan iyo baahida loo qabo hilibka kalluunka oo aad u yar . #) Dhulka oo carro san ah kuna wanaagsan beerashada . #) Ra'samaalka qaranka oo aad u yar . #) shaqaalaha ama xoogsatada kalluunmeysiga oo aad u yar .

35) kahadal waaxda ganacsiga dibadda soomaaliya ?

J) Ganacsiga xagga dibedda waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa dhaqaalaha soomaaliya , maadaama ganacsiga dibedda yahay qayb weyn oo ka mid ah dakhliga qaranka .

36) Sheeg astaamaha uu leeyahay ganacsiga dibedda soomaaliya ?

J) #) Ku tiirsananta alaabta ceydhiinka . #) Qaab dhismeedka oo yar iyo filiqsanaanta juqraafi oo ciriiri ah . #) Isbeddellada aadka u badan .

37) Goorma ayaa la'asaasay Hay'adda maamulka dekedaha soomaaliya ?

J) waxaa la'asaasay sanadkii 1962 CD .

38) Goorma ayaa la'asaasay shirkadda Diyaaradaha soomaaliyeed ?

J) waxaa la'asaasay sanadkii 7/15/1963 CD .

39) sheeg Gegooyinka diyaaradaha caalamiga ah ee soomaaliya ?

J) Soomaaliya waxay leedahay afar gegi diyaaradeed oo caalami ah:

#) Gegida Muqdisho . #) Gegida Hargeysa . #) Gegida Kismaayo . #) Gegida Berbera .

40) Tilmaam dalxiiska meelaha qadiimiga ah ee dalka ?

J) #) Booqashada masaajidda qadiimiga ah , ee ladhisay taariikhda bilowgii islaamka .

#) Booqashada magaa'looyinka qadiimiga ah.

#) Xabaalooyinkii hore kuwaa oo maxalli ahaan loo yaqaano xabaalooyinka dadka awoodda badan .